



UNITED STATES DEPARTMENT OF EDUCATION
OFFICE FOR CIVIL RIGHTS

KAALIYAHA XOGHAYAHA

Maajo 25, 2023

Saaxiibka Qaaliga ahaaw:

Sidaa an ka aragnay wararka kasoo baxaya dhammaanba waddanka ee ku saabsan xadgudubyada yuhuud nacaybka ah, oo ay kujiraan dugsiyadu,¹ waxaan waraaqdaan kuugu soo qoayaa inaan ku xasuusiyo waajibaadka sharci ee dugsiiga saaran si waafaqsan sharciga Title VI ee Xeerka Xuquuqaha Bulshada ee soo baxay 1964 (Title VI) si ardayda dhammaantood ay u helaan, oo ay kujiraan kuwa Yuhuudda ah, jawi waxbarasho oo laga ilaaliyay takoor ku salaysan isir, midab, ama gobolka qofku kasoo jeedo, oo ay kujiraan isir wadaagga ama dabecadaha qolo gaar ah.

Horaantii sanadkaan, Xaafiiska Waaxda Waxbarashada ee loogu talagalay Xuquuqda Bulshadu (OCR) waxa uu soo saaray warqad macluumaad - [Ka difaacidda Ardayda Cunsurinimada ku Salaysan Isirkooda ama Habdhaqanka qoladoodaa](#) – ayada oo sharaxaysa sida ilaalinta ay bixiso Title VI, taas oo mamnuucda midab takoorka ku salaysan sinjiga, midabka, ama meesha ay asal ahaan ka yimaadeen laguna samaynayo barnaamijyada ama waxqabadyada caawinaada dhaqaale ee ka timaada fadaraalka, waxa uu gaarayaa ardayda kuwaas oo la kulmay midab takoorka, oo ay ku jirto handaada, taas oo ku salaysan sifooyinkooda asal raaca ama abtirsiima wadaaga ay wadaagaan kaas oo xaqiiq ku salaysan; ama(ii) loo aqoonsaday:(i) muwaadin ama degan wadan ay u badantahy hal diin ama leh aqoonsi diimeed kala duwan.²

Title VI waxa uu ardayda oo dhan ka ilaalinayaa, oo ay kujiraan ardayda ah ama la rumaysan yahay in ay yihiin Yuhuudda, takoorka ku salaysan isirka, midabka, iyo waddanka ay kasoo jeedaan. Tusaale ahaan, OCR waxaa laga yaabaa in uu baaritaan ku sameeyo [cabashooyinka](#) ah in ardayda lagula kacay xadgudubyo ha ahaato asalkooda ama abtirsiimada; taas oo lagu handaday sida ay u egyihiin, ay u labistaan ama ay u hadlaan taas oo lagu xariirayo asalka ama abtirsiimada (tusaale., midabka jirka,

¹ Fiiri guud ahan Federal Bureau of Investigation (Wakaaladda Dabagalka ee Federaalka), Sheerka Fal danbiyeedyada Nacaybka ku salaysan ee Guud (Supplemental Hate Crime Statistics), 2021, Maarso 2023; sidookale fiiri, Anti-Defamation League (Jamciyadda Kahortagga Sharaf-dilka), Baaritaanada Dhacdooyinka Yuhuud nacaybka ah (Audit of Antisemitic Incidents) 2022], Maarso 2023 (la socoshada wararka sii kordhaya ee ku saabsan dhacdooyinka yuhuud nacaybka ah ee ka dhaca dugsiyada K-12 iyo xarumaha tacliinta sare). Warqadaan waxa ay u isticmaalaysaa dugsiyada in ay ugu yeerto K-12 dugsiyada iyo goobaha tacliinta sare.

² *Fiiri T.E. v. Pine Bush Cent. Sch. Dist.*, 58 F. Supp. 3d 332, 354-55 (S.D.N.Y. 2014) (ixtiraam siinta Xaafiiska Waaxda Waxbarashada ee loogu talagalay Xuquuqaha Rayidka tilmaanta ayidaysa in midab takoorka ku salaysan abtirsiimawadaaga iyo sifooyinka asal raaca waa mamnuuc Taytalka IV); sidookale fiiri 42 U.S.C. § 2000d; 34 C.F.R. § 100.3 Title VI ardayda kama ilaaliyo kaliya midab takoorka kusalaysan diinta. OCR waxa uu cabashooyinka ku salaysan diinta u gudbiyaa Waaxda Cadaalada ee Maraykanka, taas oo sharci u leh arintaan. *Fiiri* Title VI ee Xeerka Xuquuqaha Bulshada Sharciga ee 1964, 42 U.S.C. § 2000c, *et seq.*

Bogga 2—Warqada Saaxiibka Qaaliga ah: Soo gudbinta Midab takoorka Ka dhanka ah Ardayda Jewish

labis diimeedka, luuqada hadalka); ama aragtida ku salaysan in loo aqoonsaday abtirsiiimo ama sifooyinka asal raaca.

Duqsiyadu waa in ay talaabo degdeg ah oo ku haboon ay ka qaadaan si ay uga jawaabaan xadgudubyada keenaya jawiga colaadda abuuraya.³ OCR waxa uu si guud u ogaaday in jawiga colaaddu uu kajiro meesha uu kajiro hab-dhaqan xadgudub ah kaasoo heerkiisu sareeyo, baahsan, ama joogto ah si loo carqaladeeyo ama loo soo koobo awooda shaqsiyadeed si uga qaybqaato ama ka faaiidaysto adeegyada, waxqabadyada, ama mudnaanta dugsigu bixiyo.⁴

Hadii haddii jawi cadowtooyo oo isir ku salaysan jiray, dugsiguna uu ogaama ama laga rabay inuu ogaado jawiga cadowtooyada ah, OCR wuxuu qiimayn doonaa in dugsigu gutay waajibaadkiisii si waafaqsan Title VI oo ah inuu qaado talaabooyin degdeg ah oo wax ku ool ah si sax ahna looga fakaray si loo dhameeyo xadgudubka, meesha looga saaro jawi kasta oo cadaawad abuuraya iyo saamayntiisa, loogana hortago in xadgudubku soo laabto.⁵ Hadii si kale loo dhigo, dugsigu waxa uu jabinayaa Title VI marka uu ku guul daraysto in uu talaabooyin ku filan uu ka qaado si uu u soo gudbiyo xadgudubka midab takoorka, sida xadgudubka Yuhuud nacaybka.

OCR waxa uu hirgaliyay ilo badan oo kala duwan si uu dadwaynaha uga caawiyo barashada mudnaanta ay leedahay in la joogteeyo bay'ad ka fog xorna ka ah midab takoorka oo ay ku jirto midab takoorka ku saabsan abtirsiiimada ama sifooyinka asal raaca ama muwaadinimada ama wadan ay hal diin u badantahay ama aqoonsiga diinta. Fadlan fiiri liiska illaha hoose kuwaas oo laga yaabo in aad u aragto in ay ku caawin karaan. Illo dheeraad ah ayaa laga heli karaa [Abtiirsamada ama Sifooyinka Asal raaca \(Shared Ancestry or Ethnic Characteristics\)](#) bogga shabakada OCR. Dugsiyada hoose iyo kuwa sare iyo dagmooyika waxa ay sidookale caawimaad farsamo ka codsan karaan [Xarumaha Cawimaada Sinaanta ee gobolkooda](#), barnaamijka qaamuuska la hubo oo uu maamulay Xaafiiska Waxbarashada ee Dugsiyada Hoose iyo Sare, kaas oo taageera farsamada cawimaada iyo tababarada, codsi dartiis, meelaha sinjiga, jinsiga, iyo meesha ay asal ahaan ka imaaday, iyo diinta.

³ *Fiiri, tusaale., Zeno v. Pine Plains Cent. Sch. Dist.*, 702 F.3d 655, 670 n.14 (2d Cir. 2012) (ayada oo la tixraacayo shariyada dugsiga dagmada “ ee soo jireenka ah ‘in uu qaado talaabooyin macquul ah si uu meesha uga saaro’ handadaadaha ku sabsan sinjiga dugsiyadeeda” (ayadoo lasoo xiganayo Dhacdooyinka Sinjiga iyo Handadaada Lidka ku ah Ardayda ee laga hello Tilmaanta Baarista Goobaha Waxbarashada, 59 Fed. Reg. 11448, 11450 (Mar. 10, 1994))). Wixii macluumaad dheeri ah, fadlan fiiri [Dhacdooyinka Sinjiga, Handaada Lidka ku ah Ardayda ee laga hello Tilmaanta Baarista Goobaha Waxbarashada \(Racial Incidents and Harassment Against Students at Educational Institutions Investigative Guidance\)](#) (Maarso 1994); Waaxda Waxbarashada Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada, [Warqada Xadgudubyada iyo Handadaada ee Saaxiibka Qaaliga \(Harassment and Bullying Dear Colleague Letter\)](#) (Oktoobar 2010).

⁴ *See, e.g., Zeno*, 702 F.3d at 665-66 (2d Cir. 2012) (asaga oo sharraxaya in xadgudubku noqonayo mid loo baahan yahay in talaabo laga qaado haddii uu yahay mid “‘daran, baahsan, ahna waxyeelo ulakac ah’ takoorna ah” (xigasho *Davis ex rel. LaShona D. v. Monroe Cnty. Bd. of Educ.*, 526 U.S. 629, 650-51 (1999)), iyo in ficiladaas takoorka ah ay yihiin kuwo mamnuuc ah “‘ayada oo qofku siday rabtaba ha noqotee uu dheefsanayo faa’iido ama mansab walba oo dadka kale helayaan adeeg kasta, dhaqaale, ama faaiidooyinka kale ee hoostaga nidaamka dugsiga” (xigasho 34 C.F.R. § 100.3(b)(1)); sidookale fiiri [Dhacdooyinka Sinjiga, Handaada Lidka ku ah Ardayda ee laga hello Tilmaanta Baarista Goobaha Waxbarashada](#) (Maarso 1994); Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada, [Warqada Xadgudubyada iyo Handadaada ee Saaxiibka Qaaliga](#) (Oktoobar 2010).

⁵ Fiiri Waaxda Waxbarashada Maraykanka Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada [Warqada Xadgudubyada iyo Handadaada ee Saaxiibka Qaaliga \(Harassment and Bullying Dear Colleague Letter\)](#) (Oktoobar 2010).

Bogga 3—Warqada Saaxiibka Qaaliga ah: Soo gudbinta Midab takoorka Ka dhanka ah Ardayda Jewish

Hadii aad qabto su'aalo ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah ama cawimaad farsamo, fadlan booqo websaytkeena www.ed.gov/ocr ama kala xariir OCR (800) 421-3481 (TDD: 800-877-8339) or at ocr@ed.gov.

Waad ku mahadsantahay goaankaga ah in aad ardayda qaranka aad siiso bay'ad waxbarasho oo xor ka ah midab takoor.

Si Daacad ah,

/s/

Catherine E. Lhamon
Kaaliyaha Xoghayaha Xaquuqaha Bulshada

ILLAHA:

- U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Xaafiiska Xaquuqda Bulshada ee Waaxda Waxbarashada Maraykanka) [Warqad Macluumaad: Ka ilaalinta Ardayda Midab takoorka ee Ku salalysan Abtirsiimo ama Sifooyinka Asal raaca](#) (Janaayo 2023).
- U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Xaafiiska Waaxda Waxbarashada ee loogu talagalay Xuquuqaha Rayidka), [Suaalaha iyo Jawaabaha ku saabsan Amarka Fulinta 13899 \(La dagaalanka Jewish nacaybka\) iyo Dhaqangelinta Taytal VI Xuquuqaha Rayidka ee OCR Sharciga 1964](#) (Janaayo 2021).
- U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Xaafiiska Waaxda Waxbarashada ee loogu talagalay Xuquuqaha Rayidka ee U.S), [Ogoow Xaquuqahaaga: Title VI iyo Warqada Macluumaadka Diinta](#) (Janaayo 2017).
- U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Xaafiiska Waaxda Waxbarashada ee loogu talagalay Xuquuqaha Rayidka ee U.S), [Warqada Macluumaadka La dagaalanka Midab takoorka Ka dhanka ah Ardayda Jewish](#) (Janaayo 2017).
- U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Waaxda Waxbarashada Maraykanka Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada), [La dagaalanka Midab takoorka Ka dhanka ah Ardayda Asian American, Native Hawaiian, iyo Pacific Islander \(AANHPI\) iyo Muslim, Carab, Sikh, iyo Koonfurta Aasiya \(MASSA\)](#) (Juun 2016).
- U.S. Department of Justice Civil Rights Division Letter to U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Waaxda Cadaaladda Maraykanka Qaybta Xaquuqaha Bulshada Waraaq ku socota Waaxda Waxbarashada Maraykanka Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada), [Title VI iyo Daboolida Kooxaha Diin ahaanta Loo aqoonsday](#) (Sebtembar 2010).
- U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Waaxda Waxbarashada Maraykanka Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada), [Warqada Saaxiibka Qaaliga Title VI iyo Title IX Midab takoorka Diinta ee Dugsiyada dhexdooda](#) (Sebtembar 2004).
- U.S. Department of Education Office for Civil Rights (Waaxda Waxbarashada Maraykanka Xaafiiska Xaquuqaha Bulshada), [Warqada Saaxiibka Qaaliga Wax ka bedelka Koobaad](#) (Luulyo 2003).

Qofkasta oo aaminsan in uu dugsi ugu sameeyey midab takoor ka dhan ah ardayga kaas oo ku salaysan sinji, midab, ama meesha uu asal ahaan ka yimid waxa uu cabashadiisa midab takoorka u gudbin karaa OCR. Si aad u gudbisato cabasho, booqo <https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/complaintintro.html>.

Marka laga reebo shuruudaha qaanuuniga ah ee sharciyaynta Kujira dukumintiga tilmaamuhu malaha awood iyo saamayn sharci ah loogumana talogelin in lagu xiro dadwaynaha. Dukumintigan waxaa loogu talo galay kaliya in uu dadwayna siiyo cadayn la xariirta siyaasadaha laanta iyo/ama baahiyaha jira ee hoos taga sharciyada xuquuqaha rayidka ee fadaraalka.